HERITAGE INSTITUTE

CITY UNIVERSITY of Mogadishu

Baaq-daraasadeed ku socda Cilmibaareyaasha

Dibu-qaabaynta Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya

Goorta Shirka: June 25-26, 2023
Goobta Shirka: Mogadishu
Nagala soo xiriir: callforpapers@heritageinstitute.org

Waxbarashadu waa lafdhabarta qaran-dhiska, nabadgalyada,waxaanay muhiimad weyn u leedahay horumarka. Waddamada adduunku waxa ay qayb weyn oo miisaaniyadda qarankooda ka mid ah u qoondeeyaan maalgalinta waxbarashada, si ay u maalgashadaan muqtaqbalka dalkooda. Xaaladda waxbarashada Soomaaliya ayaa ah mid aad u kakan. Tusaale ahaan, inkasta oo xuquuqda waxbarashada lagu xusay Dastuurka Kumeelgaarka Soomaaliya, haddana in ka badan boqolkiiba 70 ayaa carruurta da'da dugsiyada aan helin waxbarasho aasaasi ah. Waxase bogaadin mudan dowladihii Soomaaliya u kala danbeeyay, daneeyayaasha caalamka iyo bulshada rayidka ah, ayaa nidaamka waxbarashada dalka ka soo qaaday sagxadda, isla markaana soo gaarsiiyay meel fiican. Sannadahan danbe, waxa la arkayay horumar wax ku ool ah oo laga gaaray siyaasadaha ku saabsan waxbarashada, kordhinta tirada ardayda isu diiwaangalisa dugsiyada, dib u soo celinta imtixaannada shahaadiga ah ee qaranka, dajinta manhaj cusub iyo horumarinta xirfadaha bareyaasha. Marka laga yimaaddo tallaabooyinkaas togan, waxa kale oo dalka soo foodsaaray caqabado ragaadiyay waxbarashada, kuwaas oo u baahan in ay fiirogaar ah u yeeshaan jaangooyayaasha siyaasadda, aqoonyahanka, cilmibaarayaasha iyo daneeyayaasha caalamku.

Iyadoo lagu duldhisaya cilmi-baaristii taxanaha ahayd ee hore, waxa ay Machadka Daraasaad Siyaasadda Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho martigelinayaan daraasado ku saabsan waxbarashada Soomaaliya. Machadka Daraasaadka Siyaasaadda ee Heritage iyo Jaamacadda City ee Muqdisho, oo is kaashanaya ayaa sameeyay daraasado aasaasi u ah, dajinta Qorsheyaasha Horumarinta Qaranka(QHQ9-aad). Ujeeddada daraasadahan ayaa ahaa in la abuuro, "waxbarasho loo dhan yahay, kuna jaango'an baahiyaha maxalliga ah, isla markaana la jaanqaadayaa Qorsheyaasha Horumarinta Cududda Bulshada. Cilmibaarisaha ku saaban Qorsheyaasha Horumarinta Cududda Bulshada, oo ahaa kuwo si wada jir ah loo sameeyay ayaa warbixin dhammaystiran ka bixinaya waxbarashada, caafimaadka iyo waaxda waxsoosaarka dhaqaalaha(beeraha, kalluumaysiga iyo xoolaha), kuwaas oo looga gollahaa in la dajiyo istaraatiijiyado ku saabsan raasamaalka cududda bulshada, iyo soo gudbinta habraacyo fududaynaya midaynta dadaallada daneeyayaasha ee ku wajahan horumarinta cududda bulshada.

HERITAGE INSTITUTE

CITY UNIVERSITY of Mogadishu

Sidaa darteed, ujeeddada baaq-siyaasadeedkan ayaa ah in la qiimeeyo heerka horumarka, isla markaana la qeexo goldaloolooyinka hadda jira iyo caqabadaha la filayo mustaqbalka, iyada oo rajo laga qabo in cilmibaarayaal caddaymo daraasadeed ka duulayaa keenaan aragtiyo iyo xalal wax lagaga qabanayo caqabadaha haysta waxbarashada dalka.

Cilmibaarayaasha waxaa lagu martiqaadayaa in ay soo gudbiyaan Duluc-daraasaadeedka (abstracts) mowduucyada soo socda:

Horumarinta Waxbarashada Bulshada: Caqabadaha iyo fursadaha				
Manhajka, Dhigista iyo Barashada	**Daraasaynta iyo Qiimaynta**	**Maamulka Waxbarashada**	**Baahiyaha Waxbarashada ee gaarka ah**	**Tacliinta Sare**
Dibu-habaynta,horumarinta iyo qiimaynta Manhajka Waxbarashada Macallimiinta: tababarrada iyo magdhowga Waxbarashada curruurta yaryar ee isugu jirta,Sayniska, Tignoolajiyadda, Xisaabta iyo Injineeriyada Doorka tignoolajiyadu ku leedahay waxbarashada Waxbarashada reer miyiga, waxyaalaha kale ee mowduucan la xiriira	Saxnaanta xogta imtixaanka qaranka iyo guddiyada Imtixaanka Waxyaalaha kale ee mowduucan la xiriira	Maamulka dugsiga Waxbarashada iyo Sharciga, qawaani-inta iyo nidaamya-da dugsiyada (dowliga ah-kuwa gaarka loo leeyahay) Helitaanka waxbarashada, qorshe-siyaasa-deedka luuqadda wax lagu baranayo Waxyaalaha kale ee mowduucan la xiriira	Noocyada baahiyaha ka jira waxbarahada Qiimaynta takhasusaadka macallimiinta, oo ay ku jiraan, tababarka bareyaasha qaba baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah Waxyaalaha kale ee mowduucan la xiriira	Doorka Tacliinta Sare Cilmibaarista iyo waxdhigista Maalgalinta tacliinta sare Tayada tacliinta sare ee Soomaaliya Doorka ay tacliinta sare ku leedahay bixinta waxbarasho ku habboon baahiyaha bulsho xasarado iyo colaado saameeyeen.

Hagayaasha Duluc-daraasadeedka iyo Warbixin-daraasadeedka dhammayska tiran	
Dulucda daraasadda	**Warbixin Dhammaystiran**
Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka	Waa in ay warbixintu la xiriirtaa mawduuca shirka
Waa in ay luuqaddu waadix tahay, oo saxan tahay	Waa in ay luuqaddu waadix tahay, oo saxan tahay
Waa in ay ku cad yihiin hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu	Waa in ay cad yihiin hordhaca iyo ujeeddada daraasaddu
Waa in ay ku cad yihiin Baaxadda dhibta iyo goldaloolooyinka ay cilmibaaristaadu gufaynayso	Waa in ay cad yihiin Habraaca Daraasadda Milicsi-daraasadeed urursan (Short literature review)
Habraaca Daraasadda Muhiimadda/waxtarka ay daraasaddu u leedahay arrimaha siyaasadda	Natiijooyinka, falaqaynta, gunaanadka iyo talobiximaha daraasadda
Dhererka: 200 ilaa 300 eray	Dhererka: 3,000 ilaa 4,000 oo eray
Xilliga ay ku eegtahay soo gudbinta Duluc-daraasadeedku: February 20, 2023	**Xilliga ay ku eegtahay soo gudbinta Warbixinta daraasadda oo dhammaystiran: May 30, 2023**

Waraaqaha oo dhan waxa lagu soo dirayaa cinwaankan: callforpapers@heritageinstitute.org. Waraaqaha la aqbalo waxa lagu soo jeedin doonaa, laguna daabici doonaa Ingiriisi iyo Soomaali. Wixii intaa ka faahfaahsan nagala soo xiriir cinwaanka kor ku xusan.